# *JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA*

## *DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG*

**SHARCIGA URURADA & XISBIYADA SIYAASADDA GALMUDUG**

**Sharci Lr. 20 / 2022**

*Dhusamareb, September 2022*

## Tusmada Sharciga


**CUTUBKA 1aad ..... 3**
Qodobka 1aad: Magaca Sharciga ..... 3
Qodobka 2aad: Fasiraada Erayada ..... 3
Qodobka 3aad: Xadka Adeegsiga Sharcigan ..... 4
Qodobka 4aad: Ujeedada Sharcigan ..... 4
**CUTUBKA 2AAD ..... 4**
Qodobka 5aad: Qabashada Codsiyada Diiwaan-Galinta Ururada ..... 4
Qodobka 6aad: Shuruudaha Diiwangalinta ..... 4
Qodobka 7aad: Ururada Siyaasadeed Ee Kumeel Gaarka Ah ..... 5
**CUTUBKA 3AAD ..... 6**
Qodobka 8aad: Ugudbidda Xisbi Siyaasadeed ..... 6
Qodobka 9aad: Shuruudaha Xisbi Siyaasadeed ..... 6
Qodobka 10aad: Shuruudaha Xeerka Xisbiga ..... 7
Qodobka 11aad: Isbaheysi Xisbiyo ..... 8
Qodobka 12aad: Shuruudaha Asaasiga Ah Ee Heshiisyada İsbaheysigaXisbiyada ..... 8
Qodobka 13aad: Midowga Xisbiyo Siyaasaded. ..... 9
Qodobka 14aad: Xubnaha Ay Ka Reebantahay Ka Mid Noqoshada XisbiyadaSiyaasada. ..... 9
Qodobka 15aad: Iska Casilid Xubinnimada Xisbi Siyaasadeed ..... 10
Qodobka 16aad: Xuquuqda Iyo Mudnaanta Xisbiyada Siyaasadeed. ..... 10
Qodobka 17aad: Maqaam Sharciyeed (Shaqsiyad Qaanuuneydka Xisbi) IyoCaddeynta Hantidiisa ..... 11
Qodobka 18aad: Keydinta Xogta Xisbiga ..... 11
Qodobka 19aad: Waajibaadka Xisbiga Ee Wargelinta GuddigaDoorashooyinka ..... 12
Qodobka 20aad: Kulamada Xisbigu U Qabanayo Dadweynaha ..... 13
Qodobka 21aad: Wargelin Waxka-Beddelid ..... 13
Qodobka 22aad: Diiwaan Ka-Saaridda Xisbiga ..... 14
Qodobka 23aad: Saameynta Ay Yeelanayso Ka Saarista Diiwaanka. ..... 15
**CUTUBKA 4AAD ..... 15**
Qodobka 24aad: Sanduuqa Xisbiyada, Maalgelinta Iyo Xisaabaadka Xisbiga ..... 15
Qodobka 25aad: Ilaha Sanduuqa Xisbiyada. ..... 16
Qodobka 26aad: Qeybinta  Lacagaha Sanduuqa ..... 16
Qodobka 27aad: Ujeeddada Sanduuqa Xisbiyada. ..... 16
Qodobka 28aad:  Ilaha Kale Ee Dhaqaalaha Xisbiga. ..... 18
Qodobka 29aad: Xadgudyada La Xiriira Ilaha Dhaqaalaha Xisbigu Ka Helo. ..... 18
Qodobka 30aad: Faafinta Ilaha Dhaqaale Ee Xisbiga. ..... 19
Qodobka 31aad: Xogta Laga Rabo Xisbiga Doorashada Ka Hor ..... 19
Qodobka 32aad: Hanti-Dhawrida Xisaabaadka Xisbiga ..... 20
Qodobka-33aad: Dhamaynta Khilaafaadka Xisbiyada ..... 20
Qodobka 34aad: Dhaqangalka Sharcigan ..... 20

## CUTUBKA 1AAD

### QODOBKA 1AAD

### MAGACA SHARCIGA

Sharcigan waxaa loogu yeeraa sharciga ururada iyo xisbiyada siyaasada ee Dawalad Gobaleedka Galmudug.

### QODOBKA 2AAD

### FASIRAADA ERAYADA

Erayada ku jira sharcigan, haddaan si kale loo dhigin waxaa loola jeeda sida soo socota:-

a) Guddi: waxaa loola jeedaa Guddiga Madaxabannan ee Doorashooyinka Dawlad Gobaleedka Galmudug

b) Urur siyaasaded: waxaa loola jeedaa unug is-abaabul bulsho ee siyaasadeed loona diiwangaliyay ka qaybgalka Doorashada Dawladaha Hoose inta aan loo aqoonsan Xisbi siyaasadeed

c) Xisbi: waxaa loola jeedaa urur siyaasadeed oo doorasho deegaan kadib loo ansixiyay in uu yahay xisbi siyaasadeed xaq u leh in uu ka qaybgalo tartanka doorashada guud ee Baarlamaanka

d) Shisheeye: waxaa loola jeedaa cid kasta oo aan ahayn muwaadin Soomaali ah oo reer Galmudug ah.

e) Hanti Qaran: waxaa loola jeedaa hantida guurtada ah ama ma guurtada ah ee ay leedahay Dawalada Federaalka ama Dawlad Gobaleedka Galmudug.

f) Foomka Codsiga: waxaa loola jeeda foom gaar ah oo uu buuxiyo Guddiga Doorashooyinka Galmudug oo lagu buuxiyo warbixinada caddeymaha laga doonayo ururada codsaday diiwangalinta.

g) Laan: waxaa laga wadaa qayb ka mid ah xisbiga siyaasadeed ee uu ku leeyahay meel ka baxsan xaruntiisa dhaxe.

h) Diiwangalin: waxaa loola jeedaa diiwaangalinta ururada/xisbiyada siyaasaded ee uu sameeyo Guddiga Madaxabannan ee Doorashooyinka Dawlad Gobaleedka Galmudug.

## QODOBKA 3AAD
## XADKA ADEEGSİGA SHARCİGAN

Sharcigan waxaa loo adeegsanayaa diiwaangalinta ururada iyo xisbiyada siyaasada ee Dawlad Gobaleedka Galmudug.

## QODOBKA 4AAD
## UJEEDADA SHARCİGAN

Ujeedada sharcigan waa in lagu diiwangaliyo ururada iyo xisbiyadasiyaasadda ee Dawlad Gobaleedka Galmudug.

Urur siyaasadeed waxaa loola jeedaa unug bulsho oo leh muuqaal qaybaha kala duwan ee dadweynaha, lehna isla xisaabtan dhab ah, soona bandhiga qorshayaal siyaasadeed.

## CUTUBKA 2AAD
## QODOBKA 5AAD
## QABASHADA CODSİYADA DİIWAAN-GALİNTA URURADA

Guddiga Doorashooyinka Dawlad Gobaleedka Galmudug waxa uu ku baahinayaa warbaahinta dalka sida

a) bilawga qabashada codsiyada diiwangalinta ururada siyaasadeed
b) Dhamaadka qabashada codsiyada diiwangalinta
c) Ciwaanada lagu soo hagaajinayo ee xarumaha Gobalada iyo Degmooyinka Galmudug.

## QODOBKA 6AAD
## SHURUUDAHA DIIWANGALINTA

1. Urur kasta oo doonaya in loo diiwaangaliyo urur siyaasadeed waa in uu kusoo qortaa arji foomka loogu talogalay, kuna soo hagaajiyaa Guddiga Doorashada isaga oo arjiga ku lifaaqaya caddeymaha iyo qoraalada soo socda:
   a) Goortii iyo goobtii ururku ku qabtay shirkii asaaska ururka ee ugu horeeyay
   b) Liiska magacyada asaasa-yaasha ururka, Golihiisa dhexe, Guddiga fulinta iyo habkii loo doortay.
   c) Qaab-dhismeedka ururka oo ay ku caddahay magaca ururka oodhan iyo habka loo soo gaabiyo, calaamada ururka iyo hal kudhigiisa.
   d) Urur kasta waa in uu Guddiga u keeno 10 nuqul oo daabacan oo xeerkiisa, ciwaanada gobolada iyo degmooyinka.

e) Urur kasta waa in uu keenaa caddeyn bixinta debaaji lacageed oo dhan (5,000 USD) Shan kun oo dollar oo aan celis lahayn, lacagta debaajiga ah waa dakhli dawladeed waxaana lagu shubayaaBangiga dhexe ee Dawalad Gobaleedka Galmudug.

## QODOBKA 7AAD

## URURADA SIYAASADEED EE KUMEEL GAARKA AH

1. Marka ay dhamaato mudada qabashada araajida diiwan-galinta ururada, Guddigu waxa uu hubinayaa ururada buuxiyay shuruudihii looga baahnaa, waxa ayna siinayaan ogolaansho kumeelgaar ah oo uu ururkaasi ku hawlgalo.
2. Urur kasta waa in uu ku keenaa mudada Guddigu Doorashooyinku uu xadiday qoraalada iyo caddeymaha soo socda:
   a) Si urur loo sharciyeeyo waxaa shardi ah in uu xarumo kuleeyahay Gobalada oo dhan, isla markaana leeyahay barnaamij siyaasadeed, xeer-hoosaad haga hawlihisa, gobal kasta oo kamid ah Galmudug waa in ay uga diiwangashan-yihiin (300) saddex boqol oo taageere/ codbixiye ah.
   b) Tirada, magacyada gobal/degmo doorasho waxaa lagu qeexi doonaa sharciga doorashada ee Goleyaasha DegaanadaGalmudug.
3. Ururka la siiyo ogolaansho ku meelgaar ah oo u ku hawlgalo waa in uu Guddigu siiyaa nuqul kamid ah xeerkan xisbiyada si uu ugu saleeyo habdhaqankiisa iyo xeerarkiisa.
4. Urur kasta oo siyaasadeed waa in uu xeerkiisa ku cadyahay ku dhaqanka dimoqoraadiyadda, talo wadaagga, hoggaaminta ururkuna ku timaadaa doorasho xor ah.
5. Urur kasta waa in xeerkisu waafaqsanyahay Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Xeerarka kale ee Galmudug.
6. Urur kasta waa in uu xubin ka noqo-karo qof kasta oo muwaadinSoomaaliyeed oo reer Galmudug ah.
7. Saddexda urur siyaasadeed ee ugu cododka badan tartanka koowaad ee Goloyaasha Deegaanka ayaa noqonaya saddexda Xisbi ee rasmiga ah.
8. Qabashada shirweynaha ee ururka, meeshii uu ku qabtay, taariikhdii uu qabsoomay iyo go’aamadii ugu muhiimsanaa ee lagu gaaray.
9. Xubin ama xubno loo doortay Golayaasha sharciga ah waxa uu luminayaa kursigii

loo doortay ee Golayaasha Deegaanka hadii uu ku biiro urur kale.

10. Haddii ay is la'ekaato tirada codadka laba urur siyaasadeed amain ka badan saamayna ku yeelan karta soo bixidda xisbigasaddexaad waxaa lagu celinayaa tartanka.

## CUTUBKA 3AAD

## QODOBKA 8AAD:

## UGUDBIDDA XISBI SIYAASADEED

Xisbi siyaasadeed waa urur siyaasadeed oo doorasho deegaan kadib loo ansixiyay inuu yahay xisbi siyaasadeed oo xaq u leh inuu ka qaybgalo tartanka doorashada guud ee Baarlamaanka.

## QODOBKA 9AAD

## SHURUUDAHA XİSBİ SİYAASADEED

Xisbi siyaasadeedku waa in uu buuxiyaa shuruudaha soo socda: –

a) Lahaadaa muuqaal ay ka wada muuqdaan qaybaha kala duwanee bulshada reer Galmudug.

b) Lahadaa gole fulin oo si dimoqoraadi ah loosoo doortay;

c) Ilaaliyaa midnimada dadka iyo deegaanka Galmudug.

d) U hoggaansamaa mabaadi'ida dimoqoraadiyada ee maamul wanaagga,

e) Horumariyaa ku dhaqanka dimoqoraadiyadda, iyada oo xisbiga dhaxdiisa laga qabanayo doorashooyin xor iyo xalaal ah oo joogta ah.

f) Xushmeeyaa xuquuqda dadka oo dhan in ay ka qeybqaataan hannaanka siyaasadeed oo ay ka mid yihiin dadka laga tirada badan yahay iyo dadka la hayb sooco.

g) Xushmeeyaa, dhiirigaliyaa xuquuqul insaanka, xorriyadda as'aasiga ah iyo xaqsoorka sinnaanta jinsiga.

h) Horumariyaa ujeeddooyinka iyo mabaadi'ida dastuurka Dawlad Gobaleedka Galmudug iyo sarreynta sharciga.

i) U hoggaansamaa, dhawraana hab-dhaqanka xisbiyada siyaasadeed.

j) Lagu dhisin xagjirnimo, qabiil, lahjad, hayb, sinji, lab/dhaddig, gobaleysi iyo in uusan abaabulin is-naceeb bulshada dhaxdeeda ah.

k) Isku hawlin, dhiirrigelin qalalaaso colaadeed, cabsigelin xubnaha xisbigiisa, xubnaha bulshada iyo xubnaha ururo kale.

l) Loo oggolaan in ay yeeshaan ciidamo iyo ururro hubeysan

m) Ku lugyeelan qaadashada iyo bixinta nooc kasta oo laaluush iyo musuqmaasuq ah.

n) Loo isticmaalin nooc kasta oo hantida qaranka ah danaha gaarka ah ee la xiriira doorashooyinka sida uu dhigayo sharcigan iyoshuruucda kale ee dalka.

**QODOBKA 10AAD**

**SHURUUDAHA XEERKA XİSBİGA**

1. Xeerarka xisbi siyaasadeed kasta waa in laga helaa waxyaabahansoo socda:

a) Magaca xisbiga siyaasadeed iyo sida loo soo gaabiyay

b) Astaanta iyo Calanka Xisbi siyaasadeed

c) Qaab-dhismeedka Xisbiga

d) Ujeedooyinka iyo aragtida Xisbiga

e) Maabaa’diida, qiyamka iyo himilada Xisbiga

f) Goobta ay kutaal xarunta xisbiga

g) Shuruudaha xubinimada xisbiga

h) Shuruudaha waayista xubinimada Xisbiga

i) Xuquuqda Xubnaha Xisbiga

j) Habraaca shirarka Xisbiga

k) Habraaca Doorashooyinka Xisbiga

l) Habraaca go’aan Gaarista kulamada Xisbiga

m) Habraaca dhismaha laamaha Xisbiga

n) Hannaanka Maaliyadeed ee Xisbiga

o) Warbixin sanadeedka maaliyadeed ee Xisbiga

p) Habka anshax-marinta xisbiga dhexdiisa

q) Habka Xallinta khilaafaadka Xisbiga dhexdiisa

r) Habka magaacbista saraakiisha Xisbiga ee aan la dooran

s) Habka loo raacayo wax ka beddelka xeerka Xisbiga

t) Habraaca la midawga Xisba kale

u) Habka is casilaadda saraakiisha Xisbiga

v) Habka is- kala dirista Xisbiga

## QODOBKA 11AAD
## ISBAHEYSI XISBIYO

1. Xisbiyo siyaasadeed, laba ama ka badan ayaa sameysan kara isbaheysi, waana in ay siiyaan Guddiga Madaxa bannaan ee Doorashooyinka heshiiskooda oo qoraal ah.
2. Heshiiska isbaheysiga la galay doorashooyinka ka hor, waa in loo gudbiyaa xafiiska Guddiga Doorashooyinka ugu yaraan hal bil (30 maalmood) ka hor doorashooyinka.
3. Heshiisyada isbaheysi ee la galay doorashooyinka kadib, waa in loo gudbiyaa xafiiska Guddiga Doorashooyinka, bil gudaheed kadib marki la shaaciyo natiijada doorashada.

## QODOBKA 12AAD
## SHURUUDAHA ASAASİGA AH EE HESHİİSYADA İSBAHEYSİGA XİSBİYADA

1. Heshiiska isbaheysi waa in uu waafaqsanyahay qodobada ku tilmaaman habraacyada Xisbiyada siyaasadeed ee wadasamaysanaya isbaheysiga
2. Heshiiska isbaheysiyada waa in ay galaan golayaasha fulinta eexisbiyada galaya isbahaysiga
3. Heshiiska isbahaysi waa in uu ahaado mid qoraal ah ayna ku caddahay habka loo fulinayo
4. Heshiiska isbahaysiga waa in lagu caddeeyaa Xisbiyada wada galay
5. Waa In uu caddeyaa ujeedooyinka isbahaysiga loo abuuray
6. Waa in uu caddeeyaa qaab-dhismeedka awood qaybsiga isbahaysiga

7. Hab raaca magacaabista isbaheysiga dhexdiisa
8. Hab dhaqan-wanaaga isbahaysiga
9. Waa in uu caddeeyaa habka xallinta khilaafaadka
10. Waa in uu caddeeyaa habka ku xadgudubka heshiis isbahaysi
11. Sababaha lagu kala diri karo isbahaysiga.

## QODOBKA 13AAD
## MİDOWGA XİSBİYO SİYAASADED

1. Xisbi siyasadeed waxa uu ku biiri karaa xisbi siyaasaded kale.
2. Sharci ma ahan Isku biiris kasta ee xisbiyo siyaasadeed haddii aysan waafaqsanayn sharcigan, shuruucda iyo hab-raaca xisbiyada.
3. Go’aanka ku biritaanku waa in uu noqodaa mid qoraal ah, waxaana u xil saaran fulinta ama meelmarinta heshiiska madaxda xisbiyada ee loo idmaday si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka xisbiyadaas.
4. Heshiiska isku biiridda la saxiixay waa in loo gudbiyaa Guddiga Doorashooyinka labaatan iyo kow maalmood (21) gudahood kadib marka heshiiska la saxiixay.
5. Xisbiyada siyaasadeed ee ku midoobay xisbi cusub sida ku xusan faq1-aad ee sharcigan waxa ay baba’ayaan markii la diiwaangeliyo xisbiga cusub.
6. Markii uu xisbi siyaasadeed la midoobo xisbi siyaasadeed kale, xildhibaan ka tirsan, mid ka mid ah xisbiyadaas, uu aqbali waayo go’aanka xisbiyadu ku midoobeen, waxa uu luminayaa xildhibaanimadiisa.

## QODOBKA 14AAD
## XUBNAHA AY KA REEBANTAHAY KA MİD NOQOSHADA XİSBİYADA SİYAASADA

Dhammaan qaybahan soo socda waxaa ka reeban kamid noqoshada asaasa-yaasha ama xubin xisbi siyaasadeed, ka qaybqaadashada u ololeynta, ka qaybgalka kulamadiisa iyo wax kasta oo muujinaya ujanjeerida Xisbi Siyaasaded oo wax u dhimi karta dhex dhexaadnimadiisa

a. Qaybaha kala duwan ee Ciidamada Qalabka sida
b. Garsoorayaasha Maxkamadaha dalka
c. Shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda
d. Diblomaasiyiinta heer Federaal

**QODOBKA 15AAD**

**ISKA CASILID XUBINNIMADA XISBI SIYAASADEED**

Qofkii doonaya in uu iska casilo xisbi siyaasadeed, waa in uu siiyaaogeysiis qoraal ah :

1. Hoggaanka xisbiga ka hor inta uusan ku dhawaaqin is casilaadiisa.
2. Xoghayaha guud ee aqalka baarlamaanka deegaanka/degmada uu xubinta ka yahay.
3. Is casilidda xubinta ka tirsan xisbiga siyaasadeed waxa aydhaqangelaysaa marka ay soo gaarto xoghayeyaashooda.
4. Qofna kama wada tirsanaan karo in ka badan hal xisbi.
5. Xubin ka tirsan xisbi siyaasaded waxa uu luminayaa xubinnimadiisa si waafaqsan sharcigan iyo qodobka 30aad ee dastuurka Galmudughaddii uu ku dhaqaaqo falalka soo socda. –
    a. Furto xisbi siyasaded kale;
    b. Ka qeybqaato sameynta xisbi siyasadeed kale;
    c. U ololeeyo sameynta xisbi siyasadeed kale;
    d. Dhiirri-galiyo fikradaha, danaha iyo siyaasadaha xisbi kale;
    e. Ka soo horjeesto go’aanka xisbigiisa oo ku biiro xisbi kale amaheshiis isbahysi ah la galo.

**QODOBKA 16AAD**

**XUQUUQDA IYO MUDNAANTA XISBIYADA SIYAASADEED.**

1. Xisbi siyaasadeed la diiwaangeliyay waxa uu xaq u yeelanayaa: -
    a. In uu shirar ku qabsan karo meel kasta oo kamid ah deegaanada dawladda Galmudug si uu ugu soo bandhigo dadweynaha afkaartiisa siyaaasadeed, baarnaamijyadiisa iyo weliba helitaanka iyo diiwaan-gelinta xubno cusub oo kusoo biira.
    b. In hay’adaha ammaanku sugaan nabad-gelyada goobaha xisbigu shirarka ku qabsanayo.
    c. In ay dawladda Galmudug si siman u siiso xisbiyada siyaasadeed, waqti isla’eg oo ay barnaamijyadooda uga baahiyaan warbaaahinta dawlada Galmudug (sida radiyaha,talefishinka, wargeysyada iwm).

2. Ololaha doorashooyinka xisbiyada siyaasadeed ku soo bandhigayaan barnaamijyadooda, iyo bandhigidda xubnaha uga qeyb-gelaya tartanka doorashooyinka waxa ay joogsanayaan laba (2) maalmood ka hor maalinta doorashada bilaabmayso.
3. Xisbi siyaasadeedka ku xad-gudba faqrada (2aad) ee ah in uu olole siyaaseed qabtay xilliga loo asteeyay kadib, kuna salaysan eedeymo ka yimid xisbiyo ama dadweynaha isla markaana uu xaqiijiyay Guddiga Doorashada waxaa laga joojinayaa ka qeybgalka doorashada. Codadkii xisbigu ka helay doorashada na waa la baabi'inayaa.

## QODOBKA 17AAD

## MAQAAM SHARCIYEED (SHAQSIYAD QAANUUNEYDKA XISBI) IYO CADDEYNTA HANTIDIISA

1. Xisbiga siyaasadeed loo diiwaan-galiyey si waafaqsan sharcigan waxa uu leeyahay shaqsiyad qaanuuneed oo dhammaystiran, shaabbad, waxa uuna awood u yeelanaya in uu magaciisa ku:
   a. Helo ama ku bixiyo hanti.
   b. Dacweeyo ama lagu dacweyn karo.
   c. Sameyn-karo dhammaan awoodaha isaga oo adeegsanaya waxyaabaha xisbi siyaasadeed sharcigu u oggolyahay.

## QODOBKA 18AAD

## KEYDINTA XOGTA XISBIGA

1. Xisbiga siyaasadeed waxaa laga rabaa in uu si hufan ugu hayo xafiiskiisa dhexe iyo xafisyada uu goballada ku leeyahayba dhammaan xogta la xiriirta hawlaha iyo qoraallada xisbiga sida: –
   a. Diiwaanka guud ee xubnaha Xisbiga
   b. Nuqul ka mid ah dastuurka xisbiga.
   c. Nuqul ka mid ah barnaamijka siyaasadeed iyo qorshayaasha xisbiga.
   d. Xogta la xiriirta deeqaha la siiyey xisbiga haddii ay tahay lacag, qalab, gaadiid, deegaan, ama ballanqaad deeq iyo kaalmo kaleoo ay sameeyeen xubnaha asaasay xisbiga ama deeq bixiye-yaal kale.
   e. Ku talagalka kharashka xisbiga si waafaqsan shuruucda la xiriirta maareynta maaliyadda dawladda.

f. Xogta wixii hanti ah oo uu leeyahay xisbiga goorta iyo qaabka lagu helay hantidaas.

g. Xisaab-xirka ugu dambeeyay ee xisbiga ee waafaqsan mabaadi'ida xisaabaadka oo ay ka muuqato: –

   i. Magacyada iyo cinwaannada ilaha dhaqaale ee xisbiga iyo faahfaahin ku saabsan cid kasta oo laga helay, si ay diiwaangeliyaha ugu suurtagasho in uu la xiriiro hadduu u baahdo.

   ii. Lacagta ay bixiyeen xubnaha xisbigu.

   iii. Nooca deeqaha lacag ama mood.

   iv. Deeqaha aan tooska ahayn ee xisbiga iyo dhammaan caddeymaha sida ay u soo galeen iyo sida ay u baxeen.

   v. Diiwaanka kaydinta hantida iyo deymaha iyo dhammaan dhaqdhaqaaqa xisaabaadka.

2. Qofka farageliya, waxyeelleeya ama burburiya xog xisbi siyaasadeed ee diiwaangashan, waxa uu noqonayaa dembiile marka maxkamad awooda u lahi ku caddayso, waxaana laga joojinayaa musharraxnimada, haddii go'aanku soo baxo natiijada doorashada kadib waxa uu lumminayaa kursigii uu haystay.

3. Xubinta xisbiga waxa ay xaq u leedahay in ay weydiisato nuqul ka mid ah qoraallada kaydka u ah saacadaha shaqada, iyada oo iska bixineysa wixii kharaj ah ee xisbigu leeyahay.

## QODOBKA 19AAD
## WAAJIBAADKA XISBIGA EE WARGELINTA GUDDİGADOORASHOOYİNKA

1. Guddigu si waafaqsan sharcigan waxa uu qoraal ku waydiin karaaguddoomiyaha ama xoghayaha guud ee xisbiga in uu u soo gudbiyo dukumentiga xisbiga si loo hubiyo waafaq-sannaanta sharcigan, madaxda xisbigana waxaa waajib ku ah in ay xogtaas dhaqso ugu gudbiyaan Guddiga muddo toddobo maalmood gudahood ah.

2. Guddigu waxa uu awood u leeyahay in uu keydiyo nuqul kamid ahdukumentiga xisbigu u soo gudbiyey si uu ugu keydiyo xogtaas diiwaanka xisbiga.

3. Guddoomiyaha ama xoghayaha guud ee fulin waaya amarrada uga yimid Xafiiska Guddiga waxa uu ku xadgudbey qodobkan, waxaana laga qaadayaa tallaabo sharcigan waafaqsan oo ah Canaan qoraalah iyo ganaax lacageed oo aan ka badnayn toban malyan oo Sh.So oo u dhiganta ($500).

## QODOBKA 20AAD

## KULAMADA XISBIGU U QABANAYO DADWEYNAHA

Xisbi siyaasadeedkii doonaya in uu ku qabto goob kasta kulan dadweyne waxaa waajib ku ah in uu dhawro una hoggaansamo shuruucda dalka.

## QODOBKA 21AAD

## WARGELIN WAXKA-BEDDELID

1. Haddii xisbi siyaasadeed doonayo in uu wax ka beddelo ama dib u habbeyn ku sameeyo:
    a. Dastuurkiisa.
    b. Shuruucdiisa iyo xeerarkiisa.
    c. Darajada xil, magaca ama cinwaanka madaxda xisbiga.
    d. Magaca xisbiga, astaantiisa, hal ku dhegiisa ama midabkiisalagu yaqaan.
    e. Cinwaannada iyo goobaha ay ku yaallaan xarunta dhexe amaxafiisyadiisa goballada.
    f. Xisbigu waxa uu ku wargelinayaa Guddiga waxka-beddelka uu sameeyay, Guddigu afar iyo toban maalmood (14) gudahood kadib markii uu helo wargelinta waxa uu amrayaa in lagu faafiyo faafinta rasmiga ah waxka-beddelkaas.

2. Xisbigu waxka-beddelka uu ku sameeyo arrimaha ku xusan faq (1)ee qodobkan waxa uu ku faafinayaa warbaahinta Muddo soddon (30) Maalmood ah.

3. Soddon (30) maalmood ka dib laga bilaabo taariikhda la faafiyaywargelinta sida ku cad faq1-aad, xisbigu markii uu tixgeliyo talooyinka iyo soo jeedinta dadweynaha kadib sida ku xusan faq1-aad iyo 2-aad Waxa uu dhaqan-gelinayaa waxka-beddelkaas si waafaqsan dastuurka iyo shuruucda kale.

## QODOBKA 22AAD

## DIIWAAN KA-SAARIDDA XISBIGA

1. Guddiga Doorashooyinka waxa uu liiska diiwaanka ka saarayaa xisbi siyaasadeed haddii: -
   a. Uu khilaafo qodobka 8-aad ee sharcigan ama uu ku xad -gudbomabaadi'da asaasiga ah ee dastuurka Dawladda Galmudug.
   b. Uu dhiirri-gelin waayo ama horumarin waayo magacaabid xor ah oo caddaalad ku saleysan oo la xiriirta musharrixiinta xisbiga ee doonaya in ay tartan doorasho galaan.
   c. Uu u hoggaansami waayo sharciga la xiriira magacaabista musharrixiinta.
   d. Uu xurmeyn waayo qiyamka iyo mabaadi'da asaasiga ah ee dastuurka Dawladda Galmudug.
   e. Laga helo qaabka diiwaangelintiisa mad-madow iyo gafaf sharciga ka hor imaanaya.
   f. Ay abuuraan ama ka qaybqaataan xadgudub ka hor imaanaya sharciga doorashooyinka.
   g. Ay ku dhaqmaan si ka soo horjeedda sharcigan.
2. Guddiga Doorashooyinku inta uusan diiwaanka ka saarin xisbisiyaasadeed waxa uu marka hore: -
   a. Qoraal ku wargeli-nayaa xisbiga arrimaha gaarka ah ee lagu xadgudbay.
   b. Xisbiga waxaa lagu wargelinayaa qoraal ahaan in liiskadiiwaanka laga saarayo.
   c. Xisbiga waxaa la farayaa tallaabooyinka lagu saxayo xadgudubka soddon (30) maalmood gudahood ama haddii kalewaa in ay keenaan sababaha ay ugu malaynayaan in aan diiwaanka looga saari karin.
   d. Haddii ay u muuqato in fal-dembiyeed la galay arrinta waxaa lagu wareejinayaa maxkamadda awoodda u leh.
3. Guddiga Doorashooyinka waxa uu hakinayaa diiwaan gelinta xisbi siyaasadeed inta xisbiga uu saxayo xadgudubka ku xusan faq 2-aad ee qodobkan.
4. Guddiga Doorashooyinka waxa uu liiska diiwaanka ka saarayaa xisbiga ku guuldarreysta saxidda xad- gudubyadii loo soo jeediyey muddadii la siiyey gudaheeda una hoggaansami waaya sharciga iyo tilmaamaha Guddiga sida ku cad faq2-aad iyo 3-aad ee qodobkan.

## QODOBKA 23AAD
## SAAMEYNTA AY YEELANAYSO KA SAARISTA DIIWAANKA.

1. Haddii xisbi siyaasadeed diiwaanka laga saaro sida ku cad sharciganqofna looma oggola:
   a. In uu isugu yeero kulan xubnaha ama hawl-wadeennada xisbiga waxa aan ka ahayn ujeeddo ah in ay kala diraan xisbiga ama ka doodaan sababaha ay ku diiddan yihiin diiwaan ka-saaridda.
   b. In uu ka qaybgalo kulan, wakiilna kuma diri karo magaca xisbiga, isaga oo ah xubin ama hawlwadeen metalaya xisbiga.
   c. In uu faafiyo wargelin ama xayeysiisn la xiriirta xisbiga waxaan ka ahayn ujeeddooyin kulamadda ku xusan xarafka (a) ee isla qodobkan.
   d. In uu casumo dad in ay taageeraan xisbiga.
   e. In uu bixiyo deeq ama deyn lagu maalgelinayo ama looga faa'iideynayo xisbiga iyo in uu magaca xisbiga ku qaado deeq ama deyn.
   f. In uu deeq ama deyn siiyo xisbiyo kale iyo in uu isu taago musharrax xisbi kale si uu uga qeybgalo doorashada.
   g. In uu dammaanad qaado dhaqaale nooc kasta oo ay tahay.
2. Xisbiga diiwaanka laga saaray sida ku xusan qodobka (21) ee sharcigan, haddii uu leeyahay xubno loo doortay golayaashadeegaanada degmooyinka Galmudug, xubnahaasi waxa ay sii ahaanayaan xubno inta ka harsan xilliga baarlamaanka/golayaasha iyaga oo ah xubno madax bannaan.

## CUTUBKA 4AAD
## QODOBKA 24AAD:
## SANDUUQA XISBIYADA, MAALGELINTA IYO XISAABAADKA XISBIGA

Dawladda Galmudug waxa ay abuuraysaa sanduuq lacag lagu ururiyo oo lagu magacaabo "sanduuqa xisbiyada siyaasadeed" oo uu maammulayo Guddiga Doorashooyinku.

**QODOBKA 25AAD**

**ILAHA SANDUUQA XISBIYADA.**

1. Ilaha lacagta sanduuqu ka imaaneyso waxa ay kala yihiin: –
   a. Deeqo ay bixiyaan ilaha daneeya dhiiri-gelinta iyo horumarinta dimoqaraadiyada, waxaana shardi ah in meesha Guddiga Doorashooyinku ku qaadayo lacagahan, ay noqoto meel muuqata oo daah furan oo warbaahintu goob joog ka tahay.
   b. Dakhliga kasoo xarooda diiwaan-gelinta xisbiyada
2. Marka sannad miisaaniyadeed kasta dhammaado, Guddiga Doorashooyinka waxaa waajib ku ah in uu sameeyo xisaab-xir waafaqsan shuruucda lagu maammulayo xisaabaadka hay'adaha Dawladda Galmudug, haddii lacagaha sanduuqa ku jira wax ka soo haraanna waxa ay qayb ka noqoneysaa miisaaniyad-sannadeedka cusub ee sanduuqa.

**QODOBKA 26AAD**

**QEYBINTA LACAGAHA SANDUUQA**

1. Lacagta Sanduuqa ku soo xeroota waxaa loo qaybinayaa sidan soo socota:
   a. Boqolkiiba sagaashan iyo shan (95%) lacagahaas waxaa saami ahaan (proportionally) loogu qaybinayaa xisbiyada siyaasada ee diiwangashan.
   b. Boqolkiiba shan (5%) ee soo hartay waa kharajka maammulka sanduuqa.

**QODOBKA 27AAD**

**UJEEDDADA SANDUUQA XISBIYADA.**

1. Lacagaha sanduuqa ee loo qoondeeyay xisbiyada diiwaangashan, waxaa loo adeegsanayaa ujeeddada waafaqsan dimoqraaddiyadasida:-
   a. Horumarinta iyo dhiirrigelinta guud ahaan muwaaddiniintasoomaaliyeed ee Galmudug si ay ula socdaan ugana qaybqaataan arrimaha kala duwan ee saameynta ku leh siyaasada Galmudug.

   b. Horumarinta iyo dhiirrigelinta metalaadda heerarka kala duwan ee golayaasha la isu doorto in ay ka wada muuqdaan dhammaan qeybaha bulshada ku baahsan goballada oo ay kamid yihiin haweenka, dhallinyarada, naafada, dadka laga tirada badan yahay iyo dadka la hayb-sooco.
   c. Daboolista kharashyada xisbiga gelaya waqtiga doorashooyinka iyo baahinta mabaadi'da iyo barnaamijkasiyaasaddiisa.

d. Abaabulida iyo ku wacyigelinta bulshada dimoqraaddiyadda, hannaanka doorashooyin ka iyo habraaca codbixinta.
e. Saameyn siyaasadda xisbigu ku yeelato qaabeynta ra'yiga guud ee dadweynaha.
f. Kharashaadka maammulka iyo shaqaalaha xisbiga siyaasadeed kama badnaan karaan boqolkiiba soddon (30%) lacagta loo qoondeeyeey xisbiga, inta ka soo hartayna (70%) waxaa loo adeegsanayaa hawlaha kale ee xisbiga.

2. Lacagta loo qoondeeyey xisbiga looma adeegsan karo ujeedooyin aan ahayn kuwa ku xusan sharcigan.
3. Lacagaha looga qoondeeyey sanduuqa xisbiga siyaasadeed looma isticmaali karo: –
   a. Si toos ah ama si dadban oo loo bixiyo mushaar, gunno, khidmad, abaalmarin ama faa' iido kale, xubin ama taageere xisbi, waxaan ka ahayn xubin ka mida shaqaalaha u shaqeeya.
   b. In lagu maalgaliyo ama lagu bixiyo arrin qaddiyad, dhacdo iyo munaasabad kasta oo si toos ah ama dadban uga hor imanaysa anshaxa iyo dhaqan wanaaga shaqada xafiisyada iyo hay'adaha dawladda.
   c. Arrin kasta oo ujeeddadeedu tahay in si toos ah ama dadban loogu dhiso ganacsi, lagu hantiyo fa'iido maaliyadeed ama lagu gato hanti ma guurto ah.
   d. Ujeeddo kasta oo aan la jaanqaadi karin hormarinta nidaamka dimuqraaddiyadda, xibiyada badan, hab-raaca doorashooyinka ee aan ka hor imanayn dastuurka federaalka.
4. Si waafaqsan qodob 25-aad, xisbi kasta waa in uu hubiyaa, dhaqangeliyaana nidaamka isla xisaab tanka, daahfurnanta qandaraasyada, iibka iyo gadashada agabka iyo adeegga, waana in uu mar walba diyaar u yahay in Guddiga Doorashadu, kormeer ku sameeyo xisaabaha iyo dhammaan kharashyada xisbiga udiiwaangashan.
5. Qofka ku xadgudba faqradaha qodobkan waxa uu galay danbi, waxaana la hor keenayaa caddaaladda.

**QODOBKA 28AAD**

**ILAHA KALE EE DHAQAALAHA XISBIGA.**

1. Ilaha kale ee dhaqaale ka soo geli karo xisbiyada siyaasadeed waa:
    a. Khidmadda xubintu bixiso si ay ugu biirto xisbiga.
    b. Kaalmo aan shardi lahayn oo laga helay ilo sharciga waafaqsan.
    c. Deeqo, codsiyo, hibooyin ka yimid ilo sharci ah oo aan ahayn dowlad shisheeye, hay'ado dawli ah ama kuwo aan dawli ahayn iyo dad shisheeye ah.
    d. Dakhliga ka soo xarooda maalgashi, mashaariic ama wax-qabad kale oo xisbigu leeyahay ama qayb ka yahay.
2. Xisbigu waa in uu u soo bandhigaa Guddiga Doorashooyinka xogtifaftiran oo la xiriirta dhammaan dhaqaalaha soo galay iyo meelaha uu ka soo galay.

**QODOBKA 29AAD**

**XADGUDYADA LA XIRIIRA ILAHA DHAQAALAHA XISBIGU KA HELO.**

1. Xisbiga ka hela dhaqaale dad aan muwaaddiniin soomaaliyeed ahayn, waxa uu ku xadgudbay qodobka 26 faq 1-aad xar (c) waxa uuna galay danbi.
2. Qof ama urur, hal sano gudihiis uguma deeqi karo xisbi siyaasadeed,lacag ama hanti kale ee ka badan boqokiiba shan wadarta guud ee miisaaniyad sanadeedkiisa.
3. Kharashka guud ee ku xusan faq 2-aad ee qodobkan waxa uu la xiriiraa xisaabadkii xisbiga ee la hanti dhawray sannadkii hore.
4. Haddii fulinta faqrada saddexaad suurta-gal noqon waaydo, sababtoo ah, la'aanta miisaaniyad-sanadkii tagay, lacagta ugu badan oo lagu ganaaxaya waxa ay noqonaysaa $5000.
5. Qofka ama ururka ku xadgudba faqrada (2-aad) iyo (3-aad) ee sharcigaanwaxa uu galay faldanbiyeed ciqaab lagu muteysto.
6. Xisbiga qaata deeq lacageed ee ka badan midda ku xusan faqrada (2-aa) ama (3-aad) ee qodobkan ciqaabta fal-danbiyeedka uu galay ka sokow, waxa ay dawladdu kala wareegaysaa hantidii la siiyay, waxaana laga reebayaa tartanka doorashada.
7. Looma adeegsan karo faqrada (2),(3) (6) deeqaha ama kaalmooyinka haddii ay tahay lacag ama hanti uu bixiyey xubin kamid ah asaasa-yaasha xisbiga iyada oo ah deeq bilaw ah oo hanti u noqota xisbiga sannadka koowaad ee jiritaankiisa.

8. Haddii hawl wadeen ka mid ah xisbiga ama qof kale ee u idmanaa in uumagaca xisbiga ku bixiyo xog laga rabo in uu siiyo Guddiga Doorashooyinka uu bixin waayo ama ka been sheego waxa uumutaysanayaa ganaax lacageed oo u dhigma inta uu qariyey ama ka been sheegay ama xabsi aan ka badnayn laba sano ama labadaoo la isugu daray, waxaana laga joojinayaa tartanka doorashooyinka.

**QODOBKA 30AAD**

**FAAFINTA ILAHA DHAQAALE EE XISBIGA.**

1. Marka uu dhammaado sanad misaaniyadeedka Xisbigu sagaashanmaalmood gudahood waxa uu faafinayaa: –
    a. Ilihiisa dhaqaale isaga oo caddeynaya: –
        i. Qaddarka lacagta uu ka helay sanduuqa xisbiyada.
        ii. Qaddarka lacagta uu ka helay xubnahiisa iyotaageerayaashiisa.
        iii. Qaddarka lacagta uu u helay deeq iyo kaalmo ahaan.
    b. Dakhliga iyo kharashka xisbiga.
    c. Hantida iyo daymaha lagu leeyahay xisbiga.
2. Faafinta lagu sheegay faqrada 1-aad ka sokow, waa in lagu faafiyaa laba kamid ah warbaahinta dalka.
3. Xisbiga ku xad-gudba qodobkan waxa uu mutaysanayaa ciqaab.
4. Iyada oo aan laga tageyn nuxurka faqrada 3-aad ee qodobkan, xisbiga ku guuldareysta in uu meelmariyo sharcigan waxaa laga joojinayaa lacagtii uu ka heli lahaa sanduuqa, ilaa inta uu u hoggaan-samayo sharcigan lagana gaarayo doorashada dambe.

**QODOBKA 31AAD**

**XOGTA LAGA RABO XISBIGA DOORASHADA KA HOR**

1. Xisbigu waa in uu u soo gudbiyaa Guddiga Doorashooyinka soddon (30) maalmood ka hor liiska guud ee xubnihiisa inta uusan magacaabin xubnaha uga qeyb-gelaya doorashada, waana in uu soo raaciyaa qoraal caddeynaya hantidiisa iyo daymaha lagu leeyahay oowaafaqsan foomka loo cayimay.
2. Iyada oo aan waxba loo dhimin ciqaabaha sharcigan iyo shuruucdaha kale waxaa Guddigu ka saarayaa diiwaanka xisbigii: -
    a. Ku dhaqmi waaya qodobkan;
    b. Usoo gudbiya xafiiska Guddiga Doorashooyinka xog been ah.

**QODOBKA 32AAD**

**HANTI-DHAWRIDA XISAABAADKA XISBIGA**

1. Xisbi kasta waxaa waajib ku ah in uu kaydiyo buugaagta, qoraallada xisaabaadka, dakhliga, kharashka, hantida iyo daymaha.
2. Xisbigu muddo saddex (3) bilood gudahood ah kadib dhammaadka sannad miisaaniyadeed kasta waa in uu u soo gudbiyaa hanti dhawraha guud xisaab xirka xisbiga sannad miisaaniyadeedkiidhammaaday.
3. Xisaabaadka xisbiyada waxaa xisaab-xirka sameynaya hantidhawraha guud, waxa uuna u gudbinayaa xafiiska GuddigaDoorashooyinka iyo Baarlamaanka.
4. Guddiga Doorashooyinku waxa uu waqti kasta ka codsan karaa hanti-dhawraha guud in uu xisaab-xir ku sameeyo xisaabaadka xisbi kasta ama xisbiyada oo dhan.

**QODOBKA-33AAD**

**DHAMAYNTA KHILAAFAADKA XISBIYADA**

1. Khilaafaadka ka dhasha xisbiyada siyaasadda dhexdooda waxaa loo kala qaybinayaa laba nooc oo kala ah:

A. Haddii uu khlilaafku yahay mid salka ku haya arrimaha maamulka iyo maaliyadda waxaa dacwad qaadistiisa iyo go'aan ka gaaristiisa Iska leh maxkamadda Gobolka, waxaana racfaacan loogaqaadanayaa maxkamadda darajada labaad.

B. Hadii khilaafku salka ku hayo dacwad la xiriirta arrimaha xuquuqda dastuuriga ah waxaa dacwo qaadistiisa iyo go'aan ka gaaristiisa iska leh Maxkamada sare.

C. Dacwada ma tageyso maxkamad iyada oo aan marka hore laga quusan in khilaafkaas lagu xaliyo xeerarka xallinta khilaafaadka ee u degsan xisbiyada siyaasadda.

**QODOBKA 34AAD**

**DHAQANGALKA SHARCIGAN**

Sharcigan waxa uu dhaqangalayaa marka Golaha Baarlamaanka Galmudug ansixiyo, Madaxweynuhuna saxiixo, faafinta rasmiga ahna lagu soo saaro.